Guji halkan si aad u BILOWDO ama aad u MASAXDO, ka dib dheg sii batanka TAB

MASHRUUCA BUUNDADA SARE-KACSAN EE GALBEEDKA SEATTLE

v. Abriil 2021

# CODSIGA DARYEELKA CAAFIMAADKA LAGU BADBAADINAYO EE (BUUNDADA HOOSE) SPOKANE SWING BRIDGE

## DADKA CODSANAYA MARISTA BUUNDADA HOOSE SI AY HORE IYO GADAAL UGU SAFRAAN DARYEEL DAAWO BADBAADIN CAAFIMAAD, SIDA KU CAD BIXIYAHA DARYEEL CAAFIMAAD

- Oggolaanshaha waxa kaliya leh socdaalladaa sida gaarka ah ula xiriira Badbaadinta daweynta naf Daryeel Caafimaad oo dhakhtarkaagu go'aaminayo in waqti dheer ood u sii socoto ama usoo socoto Galbeedka Seattle ay halis ku tahay caafimaadkaaga.
- Maritaanka Buundada Hoose looma oggola socodka caadiga ah, baaritaannada aan deg-degga aheyn, booqashooyinka dhaqtarka caadiga ah ee uurka la xiriira, tallaalada, ama mid kasta oo ka mida ballamada dhaqaatiirta aan deg-degga aheyn.

### TALLAABOOYINKA LAGU CODSANAYAO MARITAANKA:

1: Buuxi QEYBTA 1: Warbixinta Codsiga

2: Ka codso dhaqtarkaaga caafimaadka inuu buuxiyo QEYBTA 2: Warbixinta Cisbitaalka Bixiya Daryeelka Caafimaad IYO keen mid wadata istaambo xafiiska ama soo gudbin mid gooni ah, waraaq oggolaansho saxiixan dhaqtarku bixiyo ama waraaq calaamadka xafiiska wadata

3: Iimeel Qeybta 1, Qeybta 2, iyo oggolaanshaha saxiisan ee marista LowBridgeAccess@seattle.gov (waxey ahaan kartaa iskaan ama sawir document) ama u iimeel gareyn: Traffic permits, ATTN WSB, Seattle Dept. of Transportation, PO Box 34996, Seattle, WA 98124-4996

**4: Gudbinta foomkan macnaheedu ma aha inaad marin u leedahay buundada hoose. Waa inaad ka heshaa oggolaansho SDOT ka hor inta aadan isticmaalin buundada hoose.**

Su'aalaha, haddii aad caawinaad uga baahan tahay luqaddaada, ama gacan uga baahan tahay foomkan, fadlan la xiriir LowBridgeAccess@seattle.gov ama 206-400-7511. Fadlan dhaaf farriin cod ah oo magacaagu la socdo, halka lagaala soo xiriiri karo, iyo luqadda aad u baahan tahay, qof ayaana kula soo hadli doona.

## QEYBTA 1: WARBIXINTA CODSADAHA

| | | | |
|---|---|---|---|
| **DAABAC AMA QOR MAGAC** *(DAMBE, HORE, DHEXE XARAF)* | | | |
| Cinwaanka Boostada *(PO Box ama Cinwaanka waddada iyo lambarka abaartameentada, haddii ay jirto)* | Magaalo | Gobol | Sib Kood |
| (Eeriya Kood) Teleefanka Waqtiga Maalinta | Cinwaanka Iimeelka | | |
| Magaca Bixiyaha Daryeelka Caafimaadka (Magaca qofka ee hore iyo kan dambe buuxinta qeybta 2) | Nooca codsiga<br>☐ Codsi cusub<br>☐ Fidinta Codsiyo Hore loo Oggolaaday | | |
| Ilaa labo taargada gaariga: mid adiga ah, iyo mid dheeri ah oo kaalisadaada caafimaadka ama qofka daryeelka bixiya | | | |
| Taargada Gaariga Koowaad | Gobolka | Taargada gaariga labo (haddii loo baahdo) | Gobolka |

X ______________________________

Saxiixa qofka wakiilka codsadaha la oggolaaday

Sixiixiddaada, waxad ku qiraneysaa inaad fahamsan tahay iyo inaad u hoggaansami doontid sharciga iyo shuruudaha, iyo warbixinta xogta gaarka ahaanshaha ee ku qoran dhabarka boggan.

Halkan riix si aad u daabacato

Seattle Department of Transportation

## MASHRUUCA BUUNDADA SARE-KACSAN EE GALBEEDKA SEATTLE

# CODSIGA DARYEELKA CAAFIMAADKA LAGU BADBAADINAYO EE (BUUNDADA HOOSE) SPOKANE SWING BRIDGE

### SHARCIYADA IYO SHURUUDAHA MARISTA BUUNDADA HOOSE:

1: Dhaqtarka ku siiya daryeelka caafimaadka ayaa go'aamin doona haddii xaaladdaada caafimaad iyo barnaamijka daaweynta ay jideyn karto isticmaalidda Buundada Hoose adigoo aadaya ama ka soo laabanaya ballan caafimaad iyo daaweyn. Fadlan ha la wadaagin wax warbixin ah oo ku saabsan xaaladdaada caafimaad ama daaweyn codsigan.

2: Foomkan iyo mid GOONI AH oo oggolaansho saxiix ka socoda qofka ku siiya daryeelka caafimaad waa in loogu gudbiyaa SDOT iimeel and boostada inta ka horreysa 15ka bisha si aad hubanti ugu hesho marinka bilowga Juun 1, SODOT waa iney heshaa foomamkaaga oo buuxsan ilaa May 15.

3: Oggolaansho waxa kaliya loogu talo galay socdaallada la xiriira daaweynta Daryeel Caafimaad Nolol-Badbaadin ah taasi oo bixiyaha daryeelkaaga caafimaad uu go'aansanayo in safarradaada gaagaaban ay yihiin kuwo lagama maarmaan u ah xaaladdaada caafimaad.

4: Marista Buundada Hoose looma oggola socodka caadiga ah, baaritaannada aan deg-degga aheyn, booqashooyinka caadiga ah ee la xiriirka uurka, tallaalada, ama mid kasta oo ka mida ballamo caafimaad oon deg-deg aheyn.

5: Maritaankaaga Buundada Hoose waa la joojin karaa mar kasta haddii baabuurta ku badan yihiin buundada hoose ama haddii ay jiraan baahiyo kale oo maareynta socdaallada ah. Waa lagu soo ogeysiin doonaa haddii arrintu sidaa tahay.

6: Xadidaad in lagu soo rogo ayaa laga yaabaa tirada socodka aad ku mareyso Buundada Hoose. Marista waxa laga yaabaa in la joojiyo haddii aad dhaafto tirada socodkaaga.

7: Marista waxey hubaal tahay 90 cisho. Haddii daaweynta lagu badbaadinayo nolol oo gaarta in ka badan 90 cisho, foom codsi cusub waa in la buuxiyaa lana soo gudbiyaa 90 cisho kasta si aad isu diiwaan geliso barnaamijka marin u helista.

8: Soo gudbinta codsi u helitaan marin Daryeel Caafimaad Badbaado Naf oo buuxa kuuma xaqiijinayo in marin laguu siinayo Buundada Hoose. Codsi aan buuxin ama wax ka qaldan yihiin waxa uu sababi karaa daahid ama diidis. Haddii laguu oggolaado maritaanka, waraaq caddeyneysa oggolaanshaha ayaa laguu soo iimeel gareyn doonaa 22ka bisha ka horreysa inaad bilowdo maridda. Fadlan caddeyn ahaan meel u dhigo waraaqda oggolaanshaha. Waa inaad heshaa iimeel oggolaansho ah ka hor inta aadan isticmaalin buundada hoose. Haddii aad ku dul waddo buundada hoose oggolaansho la'aan, waxaad heli doontaa tikidh 75 doolar ah mar kasta ood dul marto xilliyada saacadaha la mamnuucay. Saacadaha mamnuuca ah waa 5ta subax ilaa 9ka fiidnimo maalmaha toddobaadka iyo 8da subax ilaa 9ka habeen maalmaha dhamaadka toddobaadka.

### CODSIYADA XOGTA HOOSE, MACLUUMAAD, IYO DAAH-KA QAADIS GUUD:

SDOT waxey diiwaan gelin doontaa tirada iyo waqtiga socod kasta uu sameeyo lambarka leysinka gaari kasta oo oggolaansho heysta ku maro buundada hoose. Codsiga helitaanka maritaanka Buundada Hoose, waxaad ku aqbaleysaa isticmaalkan macluumaadka ku socodkaaga Buundada Hoose is ujeeddo qiimeyn ah indhaha loogu hayo. Diiwaan-gelinta socdaalladan waxey kaloo u fasaxan yihiin Washington Public Records Act, waxana daaha looga qaadi karaa qeyb seddexaad oo codsata.

Macluumaadka shaqsiga ah ee lala wadaago SDOT oo ay ku jiraan magacaaga iyo leysinka taargada gaarigaaga waxa uu waafaqsan yahay sharicga Washington Public Records Act, waxana laga yaabaa in daaha looga qaado qof seddexaad oo codsada. Dhinaca Magaalada Seattle, waxa naga go'an inaan dhowrno xogtaada waxanuna hubin doonnaa dabool ka qaadis kasta iney ahaato mid sharciga waafaqsan. Si aad wax uga ogaato sida macluumaadkaan loo maareeyo eeg ama fiiri Xogta Gaarka ah (www.seattle.gov/tech/initiatives/privacy/privacy-statement).

Seattle Department of Transportation

## MASHRUUCA BUUNDADA SARE-KACSAN EE GALBEEDKA SEATTLE

# CODSIGA DARYEELKA CAAFIMAADKA LAGU BADBAADINAYO EE (BUUNDADA HOOSE) SPOKANE SWING BRIDGE

## QEBTA 2: BIXIYAHA DARYEELKA CAAFIMAAD

**DIKTOOR, DHAQTAR, AMA KAALIYE CAAFIMAAD SHAQEYSA AYAA BUUXINAYA QEYBTAAN KA DIB MARKA CODSADUHU BUUXIYO QEYBTA 1.**

### WARBIXINTA BIXIYAHA DARYEELKA CAAFIMAAD:

Waxa dheer buuxinta iyo saxiixidda qeybta hoose, waa inaad ama keentaa tiimbaro xafiis/dhaqtar oo warqaddan saaran ama keenis warqad gooni ah uu soo saxiisay xafiis warqadda magaciisu dursha sare ku caddahay ama waraaqda daawada oo sheegeysa:

1: magaca codsadaha iyo

2: iney helayaan daawo lagu badbaadinayo naf oo ku aaddan xaalad u qalansiineysa mudnaanta iney maraan Buundada Hoose.

Fadlan ha bixinin wararka caadimaad ee ku saabsan bukaanka. Usoo celi foomkan iyo warqaddaada oggolaanshaha saxiisan codsadaha.

| | |
|---|---|
| **DAABAC AMA QOR** Magaca Bixiyaha Daryeelka Caafimaad *(Dambe, Hore, Dhexe Xaraf)* | |
| Kala mudnaan siinta Xirfadda | Leysinka Lambar Shaqada ah |

| | | | |
|---|---|---|---|
| Cinwaanka Xafiiska *(PO Box ama cinwaanka waddada iyo daarta/lambarka aqalka, haddii uu jiro)* | Magaalada | Gobolka | Sib Kood |

| | |
|---|---|
| (Eeriya Kood) Telefoonka Waqtiga Maalin | Cinwaanka Iimeel |

| |
|---|
| Magaca bukaanka *(Dambe, Hore, Dhexe Xaraf)* |

### ANSWER THE FOLLOWING:

☐ Bukaankeygu wuxuu ku jiraa daaweyn caafimaad naf lagu badbaadinayo waqtiga dheer ee uu socdaalayo ama kaga imanayo Galbeedka Seattle waxey qatar halis ah ku tahay bukaankeyga. Tusaalayaasha daweynta naf lagu badbaadinayo waxa ka mida, laakinse aan ku koobneyn, Kiimoteraby, raadiyeeshan dayaalasis, iyo dhiig ku shubid ka jirta xarunta loo baahan yahay iney u aadaan ama uga yimaadaan Galbeedka Seattle.

☐ Waxan caddeynayaa in codsadaha kor ku magacaaban uu ku jiro daaweyn caafimaad naf lagu badbaadinayo taasi oo xaq u siineysa isticmaalka Buunda Hoose Spokane Street Swing Bridgre (Buundada Hoose) si uu u aado ama kaga timaado ballaamada daaweynta.

☐ Waxan soo siiyey tiimbaraha xafiiska/dhaqtarka **AMA** waraaq oggolaansho gooni oo saxiixan oo kor kaga qoran tahay magaca xafiiska ama waraaq dhaqtarku qoray.

Taariikhda iyo Goobta (City/County) Saxiixay: ____________________

X ____________________

Dhaqtarka halkan ayuu saxiixayaa (MD, DO, ARNP, ama CNM)

Lambarka Leysinka: ____________________

TIIMBARE

Seattle Department of Transportation